

Disembar 2023

## Ka-tanaasulidda Basic Plus Guudmarka

Ka-tanaasulidda Basic Plus waa mid ka mid ah shanta ka-tanaasulid ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan ee federaalka ee Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS. Ka-tanaasuliddan waxay caawinaysaa dadka halista ugu jira in ay lumiyaan xaaladooda nololeed ee hadda. Adeegyadan ka-tanaasulidda waxay dadka ka caawinayaan haqabtirka baahiyadooda caafimaad iyo kuwa daryeel iyagoo jooga gurigooda, guriga qoyskooda ama goobo kale.



### Xaq-u-yeelashada

Macaamiisha DDA ee:

- Ka soo baxa shuruudaha Naafonimada Damaannada Bulshada.
- Ka soo baxa shuruudaha Daryeelka Heerka Hay'adeed.
- Ka soo baxa jaangooyoyinka dakhliga iyo kheyraadka Apple Health of Washington. (Dakhliga iyo kheyraadka macmiilka, aan ahayn kheyraadyada iyo dakhliga qaybta qoyska.)
- Ah muwaadin Mareykan ah ama deggane federaal ahaan sharci ah oo xaq u leh.
- Haysta Qorshaha Adeegga Qofka Xuddunta u ah iyo Qiimeynta ee DDA kaas oo sharxa sida baahiyada baxnaaninta, bedqabka iyo caafimaadka ka-qaybgalahaa looga haqabtiri karo bulshada.
- U aqbala adeegyada guriga iyo bulshada-ku-saleysan sida beddelka adeegyada aan kuwa xirfadlayaasha ahayn.

### Miisaaniyad

Awoodda qaadka ka-tanaasulidda Basic Plus waa ilaa 12,439 shakhsii Sannad maaliyadeedki FY23 ee gobolka, 10,911 macmiil ayaa loogu adeegay ka-tanaasulidda Basic Plus oo kharashkooda celcelis ahaan ahaa \$821 bil kasta.

Ka-tanaasulidda waxay ku xaddidan tahay kharashka celceliska ah ee Xarumaha Daryeelka Dhexe ee loogu talagalay Shakhsiyadka qaba Naafonimada Caqliga ee iskujir kastoo ah adeegyada lagama maarmaanka u ah baahiyda macmiilka la qiimeeyay. Dadka ka tanaasulka ku jira adeegyo uma diidi karto iyadoo sababtu tahay maaliyad la'aan, haddaba kharashaadka ka-tanaasulidda ayaa si taxaddar leh loola socdaa.

### Qiimayaasha

Adeegyada ka-tanaasulidda ayaa waxaa bixiya adeeg bixiyeyaa kala duwan oo badan oo qandaraas la siiyay kuwaas oo qiimayaashooda ku xiran adeegga la bixiyay. Qiimayaasha adeegga waxaa laga heli karaa:

<https://www.dshs.wa.gov/altsa/management-services-division/office-rates-management>

## La-socoshada Tayo Hubinta

### Dibedda

- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Mashruuca Tilmaamayaasha Muhiimka ah ee Qaranka.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka Washington.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.

### Gudaha

- Xafiiska DDA ee Barnaamijka iyo Horumarinta Siyaasadda.
- Xafiiska DDA ee Tayada, U-hoggaansamidda iyo Tababbarka.
- Xafiiska DDA ee Degaanka, Shaqada iyo Adeegyada Maalintii.
- Xafiiska DDA ee U-hoggaansamidda Adeeg-bixiyaha iyo Tayo Hubinta Xilliga Kala-guurka.

### Awoodda

- Maaliyadda federaalka ee waafaqsan qaypta 1915c ee Xeerka Damaannada Bulshada, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan iyo maaliyadda gobolka.
- [Cutubka 71A RCW](#), Naafonimada Koritaanka.
- [Cutubka 388-845 WAC](#), Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan ee DDA.
- [RCW 71A.18.060](#) Codsiyada Miisaaniyadda ee Kharashaadka.

## Adeegyada Waxaa Ka Mid ah

### Adeegyada Qiimeynaa Ku Saleysan ee DDA:

- U-dhammaanshaha Bulshada.
- Shaqada ay Taageeraan Koox ama Shakhsii.
- Caawimaadda Farsamo ee Gaarka ah.
- Ka nasasho.
- Qiimeynaa Halista.
- Adeegyada Xasillinta – Baxnaaninta Gaarka ah.
- Adeegyada Xasillinta – La-talinta Qoyska iyo Shaqaalahaa.
- Adeegyada Xasillinta – Sariirta Shido Weecinta.

### Adeegyada Iskudarka oo dhan ilaa \$6,192/sannadkii:

- Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa.
- Ka-qaybgalka Bulshada.
- Kala-guurka Bulshada.
- La-qabsiga Deegaanka.
- Dabar-goynta Dhilqaha.
- Daaweynta Jirka, Hadalka, iyo Shaqada (ee loogu talagalay dadka waaweyn, marka aan loo caymin si waafaqsan dheefaha qorshaha gobolka).
- Taageero Meel Kale Laga Bixiyo.
- Kalkaalinta Xirfadeed (ka weyn da'da 21).
- Sahayda iyo Qalab Gaarka ah.
- Baxnaaninta Gaarka ah.
- La-talinta Qoyska iyo Shaqaalahaa.
- Gaadiid.
- Waxbarashada Fayeqabka.